

ILAALINTA XUQUUQDA IYO DARYEELKA MAXAABIISTA

Axmed Zaroug, waa mas'uulka ICRCda Soomaaliyuuqaabilsandhammaan hawlaha ICRCda ay ka qabato xabsiyada Soomaaliyaaya sharaxaya booqashooyinka ICRCda ku bixiso goobaha dadka lagu hayo.

S: Maxay ICRCdu u booqataa dadka xabsiyada ku xiran?

J: Waqtigan la joogo, ICRCdu waxay booqataa nus malyan lahaystayaal ah oo ku sugan i ka badan 90 waddan ama dhul aan waddan ahay ee adduunka oo dhan (Sida Afkhanistaan, Yaman, Ciraaq, Kolombiya, Filibiis, Guwantanaamo, Kashmiir iyo kuwo kale). Ujeeddada hawshan ee aadminimada ah waa in la xaqijiyo in shakhsiyadka laga qaaday xorriyadooda loola macaamilo si sharf iyo aadminimo ah. Waaan kaloo lahaystayaasha ku caawinnaa si aysaan u lumin xiriirkay ay leeyihiin qoysaskooda iyo qaraabooda.

In kastoo annaga aan su'aal ka qabin sabaabaha qof xabsi loogu hayo, waxaan xoogga saarnaan in ay muhiim tahay in si buuxda loo xushmeyo ballanqaad garsoor ah sida maxkamad cadaalad ah iyo hannaan caqli gal ah oo dib u dhigga xukunka. Arrimahaan saameyn weyn ayey ku yeelan karaan buuxdhafka maxaabiista tasoo haddana si xog leh u saameysa ku dhowaad dhamman qaybahaa ee ka mid ah xaaladda guuud lahaystayaasha ay ku sugan yihii.

Waa in hoosta laga xariiqaa in mas'uuliyyinta dadka ku haya xabsiga ay keligood ka saaran tahay mas'uuliyyadda ladhqaanka maxaabiista si ay ahaato mid aadminimo ah iyadoo xaaladdooda guud ay ficantahay. Qeyb ka mid ah sabaaabha ICRCda ay ku booqato lahaystayaasha waa in ay si toos ah talooqinkeeda ugu gudbiso mas'uuliyyinta taasoo ku caawin lahayd in ay fulin karaan mas'uuliyyaddan ee muhiimsan.

S: Booqashooyinkan sidee bay u hawlgalan?

J: Nidaamka ICRCda booqashooyinkeeda ay ku isticmaasho waa isku mid caalamkoo idil. Kooxaha koormera goobaha dadka lagu hayo waxay ugu horeynta la kulmaan taliyah xabsiga si ay uga wada hadlaan ujeeddada booqashada iyo aragtida dhanka ma'suuliyyinta ee khuseysa xaaladda ka taagan maxaabiista. Booqashooyinkale oo raad raac ah ayaa ka dib la sameyaa



Sarkaal ICRC oo si shaqsii ah ula hadlaaya maxbuus

Waxaa laga wadahadla arrimaha maamulka sida tirada lahaystayaasha, waxaana kale la soo raacaan arrimo kala duwan oo mas'uuliyyintu ay rabaan in ay u soo jeediyaan taxaddarka ICRCda.

Kulankaani ka dib waxaa la koormeeraa golalka maxaabiista iyo xitaa meelo kale sida jikada iyo isbitaalka haddiise uu jiro. Koormeerkana ka dib waxaa la sameyaa daraasaad qoto dheer ee qolalka maxaabiista, iyo kulamo si asturan loola yeesho maxaabiista ama koox ahaan ama keli keli ahaan.

Wadahadallo noocan ah ee asturan ayaa maxaabiista awood siyyaan in ay si xor leh uga hadlaan xaaladdooda taasoo ergada ICRCda ku caawisaan in ay si habboon u fahmaan oona qiimeeyaan maxaabiista xaaladhooda iyo la macaamilkooda. Macaalumadka ICRCda ay ka aruriso wadahalladan shaqsiga ah waxay u gudbisaa mas'uuliyyinta oo keliya marki ay ka hesho oggolaansho qofkii ay ka aruurisay.

Booqashooyinka waxay ku dhammadaan kulan dhereed ah oo mar kale lala yeesho mas'uuliyyinta halkaas oo ICRCda si toos ah oo asturan uga hadleyso waxyaabihii uga soo baxay booqashadooda iyo daraasaddoda, waxayna mas'uuliyyinta siyyaan talooqin ku soo jeediya tallaabooqashinka lagu hagaajin karo xaaladda ka taagan maxaabiista. Booqashooyinkale oo raad raac ah ayaa ka dib la sameyaa

saraakiisha takhaasusta leh ee ICRCda ay dayactirayaan ama hirgelinaan hannaanka biyaha iyo nadaafada waaad arki kartaa isbedel dhqso ah dhinaca caafimaadka lahaystayaasha. Marka goobta caafimaadka ee xabsiga daawo iyo alaab la keeno, durba ayaa wax isbeddel ah ku imanaya adeegga caafimaadka xagga helitaanka iyo tayada. Talooqinka iyo dardaarammada la siiyo mas'uuliyyinta xabsiyada iyo wadahadalo kuwo ka sareya ayaa kor u qaada awood dhisidda shaqaalaha xabsiga oo heero kala duwan jooga. Awood dhisidda waa hannaan muddo dheer soconeysa ayna qaadan karta sannooyin ama xitaa tobaneeyo sano iyadoo ku xirantahay dhibatooyinka ka socda nidaamo kala duwan ee maamulidda xabsiyada.

Haddi la eego waxyalaha qoysaska, mas'uuliyyinta iyo lahaystayaasha naftooda ay ka sheegayan hawlaha ICRCda ay ka qabato xabsiyada ee wadammo kala duwan ee caalamka oo dhan, hawlahan aad baa loo qiimeyaa oo loogu mahadceliyaa.

S: Maad caawisaan maxaabiista qoysaskooda?

J: ICRCda iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay adeegsadaan alaldo kala duwan oo lacag la'aan ah si qoysaka loogu taageero in ay xiriir la yeeshan qaraabooda kala tagay. Hase yeeshi iskaashiga dhinacyadaasi

Adeeggaan waxaa kaloo loo fidiyaa shakhsiyadka laga qaaday xorriyadooda kuna jira goobaha maxbuusnimada iyo qoysaskoodaba oo ku sugan gudaha iyo dibadda dalka.

Marka qof la xiro, mas'uuliyyinta waa in ay ku wargeliyaan qoyska. Taas waxaa u sii dheer, qoysaska waa in loo oggolaadaa in ay boqodaan qaraaboododa ee xiran. Marka booqashooyinka aan ay suurtagal aheyn sababtoo ah ammaanka ama dhaqaale la'aanta ama masaafada safarka, ICRCda waxay la-haystayaasha iyo qoysaskoodaba gacan ku siisaan in ay isla wada xiriiraan iyadoo isticmaalayo Farriimaha Bisha Cas (RCM) iyo wcitaan telefoon oo gaaban loona yaqaan 'Salamat'.

Sannadkii 2012 ICRCda waxay booqatay 16 jeer goobaha dadka lagu hayo. Tirada

waa qeyb ka mid ah dowkeena ee muhiimsan oo aan ahayn wax khatar keena. Aragtida ugu cabsiga leh waa wixii dhici kara haddii hannaanka xabsiyada uusan helin taageerada ay u baahanyahay, gaar ahaan marka la eego hannaanka dhismaha. Nasib darro arrintaan waa wax ka baxsan hawl-qabadka ICRCda laakinse waxaan isku dayeynaa in aan waxyaabahaan ka wargelinno hay'ado kale si ay ka qayb galaan.

S: Immisaan booqashooyin ayaa lagu waday gudaha Soomaaliya? Awood ma u leedhiin in aad booqataan dhammaan meelaha aad jeelaan lahaydeen in aad booqataan?

Sannadkii 2012 ICRCda waxay booqatay 16 jeer goobaha dadka lagu hayo. Tirada

booqashooyinka noocan ah aya gaartay 45 sannadkii 2013kii wayna tiradooda sii gaartay 58 mudadii u dhaxeysay Jannaayo ilaa Septembar 2014. Hase yeeshi awooddaan ku booqanno xad bay leedahay, laakinse waddanka oo idil baan ka hawgalnaa iyo mas'uuliyyinta intooda badan baan la shaqeeyaa. Runtii haddi la sheego waxaan jeelaan lahayn in aan in ka badan boqanno oo taageero iyo gargaar in ka badan aan fidinno. Waan hiigsigeynaa in aan boqanno dhammaan goobaha dadka lagu hayo iyadoon la firin noocyadaa maamulka ee mas'uul ka ah meelaashi.

S: Weli maad ka baqdeen in aad booqataan xabsiyada ku yaalla Soomaaliya? Khatar miyey noqon karaan?

J: Hawsheenna waxay ku salesantahay isdhexgalka dadka in ay xaqijiyo sharafta la dhaqanka maxaabiista, marka qof kasta oo ka qeyb qaatana taasi uu fahmo, booqashooyinka ayaa sii fican u dhaca. Dhab ahaan dadka qaarkooda mararka qaar kuma faraxsana booqashooyinkeena, waana jiri kartaa dareenxumo la fahmi karo oo ka timaada dhinacyada kala duwan oo ah lahaystayaasha iyo mas'uuliyyintaba.

Waxay bixisa gargaar deg deg ah haddii loo baahdo. Tan iyo bishii Febrayo 2014 barta caafimaadka ee xabsiga Baydhabo waxay si joogto ah u heshaa taakulo xagga daawooyin, qalabyo caafimaad iyo tababbar. Kooxaha caafimadda ee ICRCda waxay goobta gudafeeda la shaqeeyan shaqaalaha caafimaadka ee xabsiga. Si wadajir ah bay u fidiyan lataasho caafimadda oo shaqeysa ama an joogin shaqaale caafimadd, maxaabiista waxay badanee ku tiirsadaan qoysaskooda si ay u helaan daawooyinka iyo lacagta daaweynta. Haddii takhaatiirtu aysan gaari karin maxaabiista, markas lama daaweyn karo dadkaasi. Haddiina lahaystayaasha qoysaskooda aysan soo booqan karin, markas ma heli karaan daryeel caafimaad oo habboon.

HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

In kastoo shakhsiyadka xorriyadooda laga qaaday ay leeyihiin xaq in ay helaan daryeel caafimaad, waxay had iyo jeer la kulmaan dhibaatooyin badan, adeegganna uma heli karaan si la mid ah sidii ay u heli lahaaeyen markay ku dhexjiraan bulshadooda. Haddii goob dadka lagu hayo aysan laheyn bar caafimadd oo shaqeysa ama an joogin shaqaale caafimadd, maxaabiista waxay badanee ku tiirsadaan qoysaskooda si ay u helaan daawooyinka iyo lacagta daaweynta. Haddii takhaatiirtu aysan gaari karin maxaabiista, markas lama daaweyn karo dadkaasi. Haddiina lahaystayaasha qoysaskooda aysan soo booqan karin, markas ma heli karaan daryeel caafimaad oo habboon.

TAAGEERADA DHINACA GOOBAHA CAAFIMAADKA EE XABSUYADA

ICRCda waxay taageero joogta ah u fidisaan goobaha caafimaadka ee Xabsiyada Dhexe ee Muqdisho iyo Baydhabo, sidoo kale

S: Maad booqataan 'xeryaha ku meel gaarka ah' oo ah goobaha dadka dagaallada joojiyey loo diro si loogu dhaqan celiyo?

J: Dhab ahaantii ma booqanno. ICRCda waxay diirada ku saareysaa shakhsiyadka laga qaaday xorriyadooda, xeryaha kor ku xusan looma aqoonsado goobo xiritaan. Waa jiraal xillii ay run ahaan ku xiran yihii, xilligaas oo ah inta dadkaas aysan xeryahaan la geyn (waa marka koowaad ee dadka la soo qabto ama marka ay is dhiibaan). ICRCda waxay la shaqeysaa mas'uuliyyinta si loo horummariyo habka ladhaqanka maxaabiista ee sharafta leh xilliga xiritankooda. Marka shakhsiga loo gudbiyo xeraha ku meel gaarka ah, xaaladdodooyaa ayaa isbeddesha oo noqota mid aan xiritaan ahayn.



Koox wakiil ka ah ICRC iyo Taliye Xabsi oo ka wadahadlaya arrimo la xiriira xabsiga



Sarkaal wakil ka ah ICRC oo maxaabiista gacanta ka saaraya farriimo qoysaskooda ka socda



Koox wakiil ka ah ICRC iyo Taliye Xabsi oo ka wadahadlaya arrimo la xiriira xabsiga

taakulo ka geysaatay daawooyin muhiim ah iyo biyo nadif ah, tasoo awood siisay in laga hortago faafinta cudurkaasi. Intas waxaa u sii dheer, waxay la dhisay dhovr goobood oo gacmaha lagu meydho, waxana lagu taliyay oona lagu tababaray habka maamulka nidaamka nidaafada ee maxaabiista.

MUHIIMADA NADAFAFADDA GOOBAHA DADKA LAGU HAYO.

Shaqs kasta oo xiran wuxuu u baahanyahay biyo ku filan uu cabu, ku mayrto, ku nadifyo hareerihiisa kuna weyso qaato. Marka biyo nadif ah iyo saabuun si joogto ah loo isticmaalo taasi waxay ka hortagi kartaa cudurro farabadan oo faafa, gaar ahaan cudurrada maqaarka iyo shuban. Jikooyinka xabsiyada xitaa waxay u baahanyihii biyo ku filan oo cuntada lagu diyaariyo alaabtana lagu dhaqo.

NIDAAMMADA BIYAH A IYO NADAFAFADDA

Qimeyn qoto dheer iyo wadahadallo lala yeeshay maxaabiista iyo maamulka xabsiga ka dib, saraakiisha ICRCda ee aqoonta leh waxay taageero ka geysan karaan goobaha dadka lagu hayo si ay u xannaaneeyaan ama u dayactiraan nidaammada biyaha iyo nadaafadda ee ka jira xabsiga. Tusaale ahaan saraakiisha ICRCda ee u qaabilan Biyaha iyo Deegaanka waxay Xabsiga Dhexe ee Baydhabo ka hirgelleyen shaqo dhismeed iyo dayactir si loo hagaajiyoo kaabayaasha biyaha. Ugu horreynti si loo kordhiyo tirada biyaha oo meesha ka jira,

waxaa la dhisay haan biyaha lagu keydiyo oo sare u dhisan, ka dibna waxaa lagu xiriiriye hababka biyaha xabsiga. Si loo hagaajiyoo nadaafadda loona yarayo raaxa la'aanta maxaabiista, waxaa si buuxda loo dayactiray suuliyada iyo qeybtay qubeyska. Ugu dambeintii, ICRCda waxay dhistay madbhak cusub oo leh bi'iio nadaafadeed oo cunto lagu diyaarin karo.

GUDDIGA FAYADHOURKA

Arrinta muhimka ah ee hagaajinaya fayadhourka goobaha dadka lagu hayo waa shaqaalaha xabsiga iyo awoodda halaystayaasha ay ku maamulaan

hannaanka fayadhourka si loo joogteeyo biyo nadif ah iyo bey'ad caafimaad leh. Si loo kormeero, loo maamulo lana ixtiraamo hannaanka, waxaa la aasaasay guddi fayadhour ah oo ka kooban maxaabiis iyo shaqale xabsiga si ay u fuliyaa mas'uuliyadda la wadaago. Qorshe wadashaqeyn ah ayaa la sameeyey si loo xaqiijiyo in dhamaan meelaha muhiimka ah sida suuliyada, meelaha lagu qubeysto, kushiiimada iyo qolalka maxaabiista si joogto ah loo nadifiyo. Qashinka adkaha ah kaas oo ah mid ka mid ah kuwa inta badan keena cudurrada ayaa si habboon loo maamula.


Marka la tababbaro ka dib, xubnaha guddiga waxay leeyihiin waajibaadka in ay maxaabiista siyaan tababbar ku saabsan isticmaalka alaabta fayadhourka iyo kiiimkooyinka ay ICRCda ku taakuleeyeen xabsiga. Qol kasta waxaa loo magacaabay wakil oo ku warbixiya dhibaatada nadaafadda/fayadhourka marka ay dhacdo.



KA HORTAGA CUDURADA SHUBAN BIYODDKA IYO DAACUUNKA (PREVENTING AWD/CHOLERA)

Siyabaaha looga hortagi karo cudurka daaocum caloolaha ama shuban biyoddo:

- Ku maydh gacmahaaga marwalbo saabuun iyo biyo isticmaalka suuliga ka dib
- Ku maydh gacmahaaga marwalbo saabuun iyo biyo ka hor diyaariinti cuntada iyo inta aadan cunin cuntada



ICRC HORUMARINTA FAYA-DHOURKA

ICRC
Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrt Cas

2014/01/24/02/2015/1000

Isticmaal marlwabo suuliga kana ilaalii xayaanka iney ku saxroodaan daaradda dhexe ee xabsiga

Warqad daabacan ee ICRCda ka isticmaashor Soomaliya si loo horumariyo Faya-dhoulka

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
Nairobi - Kenya
T +254 20 2719 301
www.icrc.org
© ICRC, February 2015

All illustrations: ICRC

2014/01/24/02/2015/1000

Xxxxxxx

TABABBAR XIRFADEED XABSIGA DHEXDIISA

Mashaariicda tababbar xirfadeedka ICRCda ay ka waddo xabsiyada asal bay u yihiin badbaadada, soo celinta sharafta iyo bulsho dib isudhexgelinga maxaabiista. Shaqada miradhalka ah waa udubdhexaadka isku kalsoonaanta shahsiga waxayna wax ka geysataa caafimaad jireed iyo maskaxeed. Kala duwnaanshada iyo nooc nooca hawlah maxaabiista ay ka fa'iideysan karaan ayaa u suurtageliya in ay ku sifoobaan xubno waxtar ku leh bulshada marka la sii daayo ayagoo la siyey shaqo-xirfadeed oo gacan-ku qabod ah una suurtagelineesa fursado shaqo oo badan.



Tababbarka tolidda dharka ee laga wado qaybta dumarka

ICRCda waxay sannadkii 2013 xabsiga Boosaaso ka hirgelisay mashaariic tababbar xirfadeed ah waxayna dhowreysa in hawlahaan ku fidiso meelo kale oo goobaha dadka lagu hayo ah. Waqtigaan la joogo 60 la-haystayaal oo isgu jira lab iyo dhedig ayaa lagu diiwaangeliy tababar xirfadeed lagu baranayaalo alwaax qoridda, sameynta alaab guri/xafis, fuundi iyo xirfadaha dhar tolida.

SHAOQ BARASHO XABSIGA GUDIHIISA

Magacyagu waa 'Xaajiyow Maxammed'. Asal ahaan waxaan ka soo jeedaa Mudug halkaas oo xaskeyga iyo labadeyda wiil oo da'yar ay ku noolyihiin. Xabsigaan waxaan ku xiranahay muddo 2 sano.

Sannadkii 2012 ayaa markii ugu horreysay xabsiga ku arkay kooxda ICRCda. Waxay yimaadeen in ay booqdaan qolalka xabsiga oona wadahadlaan halaystayaasha kana hadlaan nolol maalmeedkeena, xaaladaheena iyo caafimaadkeena. Alaabta fayadhourka loogu talagalay oo ICRCda qeybisay waxaa ka mid ahaa saabuun, baalidyo iyo walxaha wax lagu nadifiyo. Sidoo kale maxaabiistiin aan awood u lahayn in ay akhbaaro ka helaan reerhooda sida aniga oo kale, waxaa ergada ICRCda ay naga caawisay in na soo gaarsiiso farrimo. Alaabta ICRCda na siis waxay muuqaan karaan wax yar laakinse dad badan noloshooda ayay beddeli karaan. Sannad

ka dib waxaan maqlay in ICRCda iyadoo wadashaqeyn ka heleen maamulka xabsiga ay rabaan in halaystayaasha u bilaabaan tababbar xirfadeed. Markii hore ma aanan rumeysan. Yaa daneynaya in halaystayaal la tababbar?

Deegaankeyga gudiihiis abid ma aanan ka helin fursad tababbar shaqo oo ka baxsan isticmaalka hubka. Sidaas darteed waxaan noqday askari ka dib waxaa la igu daray kuwa ilaaliya ammaanka shaqsiyaadka muhiimka ah.

ICRCda iyo maamulka xabsiga baan ku mahadcelinaya in ay igu dareen tababbarka nijaarnimada. Kuwo kalena waxay baranayaan fuundinimo ama

Xirfadaasi waxay gebi ahaan bedeshay nolosheyda, waxay xitaa hagaajisay caafimaadkeyga xabsiga dhexdiisa. Hore waqtigoo dhan waan bukay anigoo aan laheyn awood ku dhaqdhaqaao. Hada waxaa igu buuxa himmo shaqo. Qof cusub oo shaqo cusub yaqaan ayaan ahay. Mustaqbalka marka xorriyadeyda aan helo waxaa qorsheynayaa in aan ka shaqeysto hoosooyinka lagu qoro alwaaxda. Maalgelin yar ayaan ku qorsheyn karaa hawl ii gaar ah si aan u madaxbannaando. Waaqooyinka xitaa fidaaniya casharadii xabsiga ku bartay anigoo baraya wiilashedyada sifo si tobinkooda farood ay si habboon ugu sameeyan waxyaalo lagu ciyaaro iyo boonbalo ka sameysan alwaax.



Maxamed (direys cas) oo baranaya habka loo sameeyo alaabta guriya iyo xafisayda

dawaarlenimo. Weli way igu adkeyd in aan rumeysto in xabsiga dhexdiisa hawl ka heleyno. Tababbar wuxuu u baahanyahay goob, alaab, tababarayaal leh dhiiringelinyo badan si hore ugu riixaan mashruuca.

NOLOSHA XABSIGA KA DIB

Lix bilood ka hor ayaan bilaabay, maanta waxaanawoodaa in waxbadangacmaheyga ku sameeyo. Fiiri, tusaale ahaan miiskaan iyo kursigaan dhammaantooda anigaa sameeyey. Waa hubin kartaa, waa isticmaali kartaa, waa kaamil. Alwaax waxaan kaa sameyn karaa wax kasta gurigaaga u rabto.

Booqashooyinka shaqsiyaadka xorriyadooda laga qaaday waa ubud dhexxaadka iyo qeybta taariikhiga ah ee hawsha Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrt Cas (ICRCda) ay ka qabato daafaha kala duwan ee caalamka. Maxaabiista dagaalka ee ugu horeyay ay ICRCda booqatay waxay ahayeen kuwii ku sugnaa Galbeedka Roomaaniga iyo Serbiyintta oo la xiray xilligii Dagaalkii Koowaad ee Dunida 1914-1918- Tan iyo waagaas, ICRCda waxay booqatay kumanaan maxaabiis oo dagaal ah xilligii Dagaalka Caalamka iyo weliba maxaabiis siyaasadeed sida Nelson Mandela intii uu xirnaa. Had iyo jeer hawshan waxay aheyd ubucda hawlgalka ICRCda waana mid ka mid ah waxyalahu muhiimka ah oo jawaabaha kala duwan ee muhiimka ah ee aan ka bixinno colaadaha iyo xaaladaha deg degga ah ee aadminimo.

ICRCda waxay ka qabataa Soomaaliya muddo 38 sano. Waqtigaas gudiihiisa, gaar ahaan intii u dhexeysay sanadkii 1977kii iyo 1988kii, waxay booqan jirtay maxaabiistii la xiray xilligii colaaiddi Ogaadeeniya. Dhowaan tan iyo 2012kii ICRCda waxay booqataa dadka ku xiran xabsiyada, saldigayada boliiska iyo kuwo hoostaga xaaladaha kale ee galalaasha.